PROMETRIC

WASHINGTON

Waaxda Caafimaadka Gobolka Kalkaaliyaha Daryeelka Guriga ee Sharciyeysan

Warsidaha Macluumadka Codsadaha

Hirgalaya mey May 1, 2016

Waa Daabicitaankii waxa leh Prometric

U Bixisa Imitixaannada Liisanka Gobolka Washington

Xuquuqda Daabaca© 2016 Prometric Inc., Shirkad Delaware. Dhammaan xuquuq dhowran.
Dib loo habeeyay 20160415

Tusmada

Horudhac 1

Farriin ka socota DOH iyo Prometric 1
Arrimo Dulmarka 1

Qaabsocodka codsiga imtixaanka 3

Goobaha Imtixaanka 3
Goobta gudaheeda imtixaanka lagu qaato 3
Xarun imtixaan goboleedka 3
Warqadda oggolaanshaha imtixaan qaadasho 3
Macluumaadka khidmadda 4
U Waafajimaha Gaarka ah ee Imtixaanka. 4
Beddelidda jadwalka an ballanta 5

Guudmarka Imtixaanka 5

Imtixaanka aqoonta 6
Dulmarka ka koobnaanta Imtixaanka 6
Dulmarka Ka Koobnaanta Imtixaanka Aqoonta 6
Imtixaanka xirfadda 6
Codsadaha matalaya macmiilka 7

Qaadashada imtixaanka 8

Waxyaabaha aad soo qaadanaysid Imtixaanka 8
Xeerarka xarunta imtixaanka 9
Natiijada imtixaankaaga 10
Imtixaanka aqoonta 10
Imtixaanka xirfadda 11
Dib u Eegga Imtixaanka Aqoonta 11
Habsocodka rafcaanka 12

Horudhac

Farriin ka socota DOH iyo Prometric

Sharciga gobolka Washington ayaa faraya in qayb ka mid ah shaqaalaha daryeelka muddada dheer ay qaataan sharciyaynta Kalkaaliyaha Daryeelka ee Guriga. Waaxda Caafimaadka (DOH) Gobolka Washington ayaa ka masuul ah kormeerka qaaditaanka imtixaanka iyo siinta sharciyaynta dadka ka gudba imtixaanka.

DOH ayaa qandaraas kula gashay shirkadda Prometric Inc., si ay u bixin lahayd Imtixaanka sharciyaynta Kalkaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) ee Gobolka Washington. Warsidahan ayaa sifaynaya ayaa habraaca la isku diiwaangeliyo ee imtixaanka HCA loo qaato.

Mey 1, 2016: CODSIGA CUSUB IYO IMTIXAANKA

CODSADYAASHU WAA INAY BIXIYAAN CINWAAN IIMAYL BALLNTA IMTIXAANKA LOOGUI QABTO.

Imtixaanada qoran iyo ku afka ah ayaa loo mideeyay hal imtixaan aqooneed; dhammaan codsadayaasha ayaa maqli kara imtixaan afka ah markay imtixaanka qaadanayaa. Imtixaanka Aqoonta ayaa inta ugu badan su'aalo run/been oo leh qaarkood sawirro iyo animeeshin gaaban.

Sharciyaynta gaarka ah ee DOH iyo imtixaanka Prometric ayaa lagu mideeyay hal foom codsi. Imtixaan qaatayaasha marka ugu horeysa qaadanaya ayaa hadda u diri doona codsiyadooda iyo bixintooda Washington State Department of Health (DOH), oo markaa u wargalin doona Prometric markuu codsade mutaysto imtixaanka. Si aad marin ugu hesho barta internetka DOH iyo codsiga guji **here**.

Dhammaan dib u qaatayaasha imtixaanka ayaa ula xiriiri doona Prometric si toos ah imtixaanka ballan u qabashada.

Arrimo Dulmarka

Raac tallaabooyinkan haddii aad rabtid inaad qaadato imtixaanka HCA:

Si aad u qaadato imtixaanka HCA oo aad heshid sharciyayntaada

1 U dir **Codsiga Imtixaanka Kalkaaliyaha Daryeelka Guriga** ee dhammayska tiran DOH.

imtixaanka. (Bogga 6)

3 Qaado imtixaanka ballanta loo qabtay. Hubso inaad soo qaadato aqoonsiyada loo baahan yahay goobta imtixaanka. (Bogga 8)

4 Haddii aad ku guulaysatid imtixaanka oo aad buuxisid shuruudaha sharciyaynta, DOH ayaa ku siin doonta sharciyeynta.

5 Haddii aad ku dhacdo imtixaanka loo baahn ayahay, la xiriir Prometric si aad ballan ugu qaadato imtixaankaaga.

Si aad u hesho jawaabo aan lagu bixin warsidahan

Kala xiriir Prometric dhammaan wixii su'aalo ah ee qabtid ama weyddiisadyada macluumaadka ku saabsan habsocodka imtixaanka:

Prometric
7941 Corporate Drive
Nottingham, MD 21236
Telefoon: 800.324.4689
Iimayl: WAHCA@prometric.com
Bogga internetka: **www.prometric.com/wadoh**

Kala xiriir DOH wixii suaalo ah ee la xiriira sharciyaynta:

Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington
Health Systems Quality Assurance Division
Customer Service Office
111 Israel Road SE
P.O. Box 47877
Olympia, WA 98504-7877
Telefoon: 360.236.4700
Faakis: 360.236.2701
Iimayl: **Homecareaides@doh.wa.gov**.
Bogga internetka:
www.doh.wa.gov/LicensesPermitsandCertificates/ProfessionsNewReneworUpdate/HomeCareAide.aspx

Qaabsocodka codsiga imtixaanka

Qaybtani waxay sifaynaysaa:

- Shuruucda looga baahan yahay uqalmitaanka qaadashada imtixaanka Sharciyaynta HCA.
- Macluumaadka sida loo buuxiyo foomka codsiga.
- Macluumaadka sida loo beddasho ballanta imtixaanka.

Imtixaan qaatayaasha waqtiga ugu horreeya: Buuxi **codsiga** oo ku soo celi DOH adiga oo raaca tilmaamaha codsiga. DOH ayaa idiin wargelin doonta adiga iyo Prometric marka laguu ansixiyo qaadashada imtixaanka.

Dib u qaatayaasha imtixaanka: Waxaad ula xiriir doontaa si toos ah Prometric inaad dib ballanta ugu qabsato imtixaanka. Haddii aad lacagta ku bixinayso kaarka deynta, waxaad u wici karta Prometric, oo aad siii kartaa macluumaadkaaga codse, oo aad ku gudbin kartaa lacag bixintaada telefoonka. Haddii aad lacagta ku bixinayso jeegga bangiga (cashier's check) ama money order, waa inaad soo gudbisaa codsi (lagha helo xagga ugu dambaysa ee dukumentigan) oo u la socdo jeeggu.

Goobaha Imtixaanka

Waxa jira laba meelood oo uu codsadu ku gali karo imtixaanka. Haddii barnaamijka tababbaritaanka ee aad adigu ku qaadatay tababbaritaankaaga uu saxeexay inay noqdaan goob gudaheeda imtixaanka lagu qaato, meeshaas ayaa aad imtixaanka ku qaadanaysa. Haddii kale, waxaad ku qaadanaysaa xarun imtixaan goboleed.

Goobta gudaheeda imtixaanka lagu qaato

Haddii barnaamijkaaga tababbaritaan u bixiyo goob imtixaan isla meesha ah waxay ku siin doonaan koodhkaooda goobta.

Xarun imtixaan goboleedka

Haddii aad ku qaaadan kari waydo imtixaanka xarunta aad tababbarka ku qaadatay, waxaad ku gali kartaa xarun imtixaan goboleed. Hubso inaad ku qorto koodhka goobta aad jeceshahay inaad ku qaadato imtixaanka foomka codsiga DOH.

Liiska goobaha imtixaanku meelaha ay ku yaallaain ku yaalliin ayaa laga heli karaa onlayn halkan**www.prometric.com/wadoh**.

Muhiimka Gobaleed meelaha ay ku yaalliin ayaa isbeddeli kara. Haddii aad rabto inaad goob xaqiiso, fadlan wac800.324.4689.

Warqadda oggolaanshaha imtixaan qaadasho

Markay Prometric jadwalka galiso imtixaankaaga, waxa heli doontaa Warqadda u Oggolaanshaha Imtixaanka Qaadashada **iimayl ahaan**. Warqaddan waxaa ku qoran waqtiga, taariikhda, saacadda iyo goobta gaarka ah ee ballantaada imtixaanka. Haddii taariikhda laguugu qabtay imtixaanka ay kuu suurtogeli weydo, soo wac 800.324.4689 **isla markaaba** si laguugu beddalo ballanta imtixaanka.

Macluumaadka khidmadda

Haddii aad tahay imtixaan qaate ay ugu horeyso, fadlan guji **here** si aad ugu hesho macluumaad biximaha.

Dib u-qaatayaasha imtixaanka:

Khidmadda imtixaanka **lama soo celiyo qof kalena laguma wareejin karo**. Waxa kaliya ee lacagta laguu soo celinayaa karaa haddii aad buuxin waydo shuruudaha imtixaanka.. Waa inay khidmaddu la socotaa foomka codsiga. **Codsiyada la soo diray iyada oo aan lacagta habbooni la socon waa la soo celin doonaa**.

Khidmadda waa in lagu bixiyaa habka soo socota:

- Waxa kaliya ee Prometric ay aqbashaa "money Orders" ama jeegga bangiga lagu bixiyay ee lagu qoray in ay ku socdaan Prometric. **Jeegga lacagta ee qofka u gaarka ah ama kaashka lama aqali doono**.
- Lacagta wax kale ee lagu bixin karaa iyada oo la isticmaalo kaarka deynta VISA, MasterCard American Express. Prometric ayaa soo xajiin doonta kaarka deynta inta aanay habsocodsiin isqoritaanka. Arrimo dhib u dhaca ayaa lala kulmi karaa ayaa kaarka deynta la xaqiijin kari weydo. Weyddiisiga ansixinta kaarka deynta ayaa mar kaliya ayaa kaliya la habsocosiin doonaa. haddii la diido, waxa loo baahan yahay hab kale oo lacag bixin.

Xeerka lacag u soo celinta. Haddii la ogaado inaadan uqalmin dib u qaadashada imtixaanka, khidmaddaada imtixaanka ayaa laguu soocelin doonaa.

U Waafajimaha Gaarka ah ee Imtixaanka

U waafajin imtixaan macquul ah ayaa la siiyaa imtixaan qaatayaasha haysta dukumentiyo naafanimo lagu aqoonsan yahay hoosta xeerka Dadadka maryaknka ah ee Naafanimada Qaba (ADA) si ay ay u helaan fursad ay cilmigooda iyo xirfadahooda u soo bandhigaan.

Waxa loo baahan yahay ogaysiin hore oo soddon maalmood u diyaarinta imtixaanidda gaarka ah. Waxa laguu sheegi doonaa go'aanka inta aan imtixaanka laguu ballamin waxay yihiin natiijada arrimo u fiirsiga. Arrimo u waafajintani ma laha lacag ku dallac dheeraad ah.

U waafajinta markuu Ingiriisigu yahay luqadda labaad (ESL) Haddii u Ingiriisigu u yahay luqaddaada labaad, caqabada luqadduu looma qaadanayo naafanimo. Hase ahaatee, waxaad dooran kartaa inaad ku qaadato imtixaanada Af Ruush, Isbaanish, Ukraine, Fiyatnaamiis, Kuuriyaan, Shiinaha La Fudaydiyay, Soomaali, Samoan, Khmer, Tagalog, Carabi, ama Laoshiyaan. Xulashadan **waa in** lagu dul calaamadeeyaa foomka ka hor maalinta imtixaanka ballanta loo qabtay. Adigu **ma** weyddiisan kartid inaad ku qaadato imtixaanka luqad kale maalinta imtixaanka.

Haddii aad rabto inaad ku qaadato imtixaanka luqad kale oo aan ku qornaynkorka, fadlan buuxi foomka u waafajinta imtixaanka oo gaar ahaan u sheeg luqadda aad rabto inaad ku qaadato imtixaanka, oo raaci lahjadda, hadday khusayso. Prometric ayaa kuu soo heli doonta turjumaan meesha yimaad oo qof ahaan kugu tujuma labadaba imtixaan Aqoonta iyo xirfaddaba.

Beddelidda jadwalka an ballanta

Si aad u beddesho ballantaada, waa inaad kala soo xiriirto Prometric800.324.4689. Khuidmadda eddalidda ballantu waa sidan soo socota:

- **$25 khidmad ah** si loo beddelo ballanta **uilaa lix maalmo shaqo** ka hor imtixaankaaga.
- Waxa bixin doontaa khidmad imtixaanka oo buuxda haddii aad beddashid in ka yar shan maalmood oo shaqo ka hor imtixaanka, ama haddii laguu diido inaad gashid imtixaanka sababo kale awgeed.

Haddii aad maqanaato ama aad soo daahdo. Haddii ballantaadu ku dhaafto ama aad habsaantid oo laguu diido inaad gasho imtixaanka, waxa kaa khasaaraya lacagtaadii khidmadda kaddibna waa inaad bixisaa khidmad kale si aad imtixaan kale u gashid. Haddii imtixaanku uu ku dhaafo sababo xanuun awgeed ama arrin degdega oo kugu timid fadlan la soo xiriir Prometric. Waxa dhici karta in lagaa dhaafo lacagta beddalidda haddii aad keentid caddaymo xanuunkaaga ama xaaladaha degdegga ah.

U xiritaan xaalado imerjansi. Cimilo maalmeed daran ama xaalad degdeg ah ayaa u karta baajinta imtixaannada jadwalka gashan. Haddii ay sidaasi dhacdo, Prometric ayaa isku dayi doonta inay telefoon ma iimayl kugula soo xiriirto. Waxaad wici karta waliba 800.324.4689 si aad u ogaatid in la xiray goob. Haddii goobta la xiray, imtixaankaaga waxa ballanta lagugu beddali doonaa bilaa khidmad ballan u beddelid.

Dib-u-qaadasho imtixaan. Waa inaad qaadataa oo aad ku guulaysataa labadaba imtixaanka Xirfadaha iyo imtixaanka Aqoonta. Waxaad haystaa saddex fursadood muddo laba sano ah laga soo qaado dhammaystirka tababbaritaanka. Waxa lagaaga baahan yahay inaad bixisid khidmad mar kasta oo aad galayso imtixaan. Waxa kaliya lagaa rabaa inaad markale dib u qaadatid imtixaanka aad ku dhacday laga reebo sida lagu sheegay hoosta.

Ogsoonow Haddii aadaan ku guulaysan bixitaanka labada imtixaanba saddex fursadood ka dib, waa inaad dib uga tababbartaa barnaamij sharciyeysan oo tababbaritaan kalkaaliye daryeel guri ah oo aad dib u qaatadaa labada imtixaanba markale.

Guudmarka Imtixaanka

Imtixaanka Sharciyaynta Kalkaalinta Daryeelka Guriga ee Gobolka Washington ayaa ka kooban **Imtixaanka aqoonta** iyo imtixaanka ficil lagu muujinayo hawsha oo loo yaqaan **Imtixaanka xirfadda**.

Waa inaad ka gudubtaa labadaba imtixaanada Aqoonta iyo Xirfadaha laba sano markaa dhammayso tababbaritaankaaga barnaamijka kalkaaliyaha daryeelka guriga. waxaad haysataa saddex fursado iskuday. Haddii aad ku dhacdiid midkoodba imtixaanada Aqoonta iyo Xirfadaha saddex jeer, waxa lagaaga baahn doonaa inaad dib u tababbarato oo aad dib u qaadato imtixaanka Aqoonta iyo Xirfadaha.

Imtixaanka aqoonta

Imtixaanka aqoonta ayaa ka koobnaan doona 60 su'aalo jawaabaha la kala dooranayo oo kugu imtixaamaya cilmigaaga guud iyo waajibaayada looga baahan yahay kalkaaliyaha daryeelka guriga. Waxaad haysataa 90 daqiiqado inaad ku dhammaysid imtixaanka.

Aqoonta waxa lagu bixiyaa kombuyuutarka Uma baahnid khibrad kombuyuutar si aad u isticmaashid nidaamkan. waxaad isticmaalaysaa mawska (mouse) kombuyuutarka si aad u doorato jawaabta saxda ah. Su'aalo tusaale ah ayaa laga heli karaa **halkan**.

Fadlan ogsoonow in inta lagu jiro imtixaanka, inaad leedahay doorbidka inaad xulato maqalka su'aalaha in laguu akhriyo markaad akhriyayso ee aad ka jawaabayso su'aalaha dusha kombutarka. Waxaad dib u daaran kartaa in su'aalo inta jeer aad u baahan tahay inta lagu jiro imtixaanka.

Dulmarka ka koobnaanta

Mowduucyada u Imtixaanka aqoontu ku saabsan ayahay ayaa hoosta ku qoran.

Dulmarka Ka Koobnaanta Imtixaanka Aqoonta
60 su'aalood—90-daqiiqo wakhti loo xaddiday.

Ogsoonow: Toban su'aalood oo ku jira imtixaankan waxa loo isticmaalayaa tirakoob ahaan kaliya oo natiijadooda laguma darayo nidaamka dhibcaynta.

Qaybta I:

Kaalinta iyo Mas'uuliyadaha Kalkaaliyaha Daryeelka ee guriga — 38%
Mas'uuliyadaha Kalkaaliyaha Daryeelka ee guriga — 38% [19 su'aalood]

- **A. Doorka shaqaalaha iyo xuduuddooda**
- **B. Xuquuqda iyo ixtiraamka isticmaalaha**
- **C. Si xun ula dhaqanka iyo ka warbixinta waajibka ah.**
- **D. Aragga Iyo Ka Warbixinta**
- **E. Xirfadaha Wadahadalka**
- **F. Xallinta dhibaatada**
- **G. Is ilaalinta shaqaalaha**

Qaybta II:

Taageerada Caafimaadka Jirka iyo Maskax-bulsheedka— 44% [22 Su'aalood]

- **A. Taageerada waxqabadyo maalmeedka nolosha (ADL)**
- **B. Daryeelka maqaarka**
- **C. Nafaqada iyo cabbidda**
- **D. Ka caawinta dawooyinka**
- **E. U nuglaanta dhaqaneed**
- **F. Caafimaadka iyo caafimaad qabka**
- **G. Murugada iyo qof ku waayitaanka geerida**

Qaybta III:

Kor u qaadidka ammaanka — 18% [9 Su'aalood]

- **A. Xakamaynta infekshanka**
- **B. Cuduradda dhiigga laga qaado iyo HIV/Aydhis**
- **C. Ka hortagga soo dhicidda**
- **D. Diyaarinta cuntada iyo hab ula dhaqankeeda**

Imtixaanka

Imtixaanka Xirfadda wakhtigiisu wuu go'an yahay. Waxa lagugu tijaabinayaa shan xirfadood. Marka aad samaynaysid saddex xirfadood oo laguu qoondeeyay waxa kale oo la eegi doonaa laba xirfadood oo kale — maydhidda gacmaha iyo waxyaabaha caadada u ah daryeelka caamka. Waxyaabaha Caadada u ah Daryeelka caafimaadka waxay ka mid tahay xirfad kasta sida, xuquuqda daryeel qaataha, sida aad ula hadlaysid daryeel qaataha, sida u sugeysid amaanka daryeel qaataha iyo raaxada ama infekshanka u

kontroolaysid. Si aad ugu najaxid imtixaanka qaybtiisa Xirfadda waa inaad ku guulaysataa shanta qayboodba.

Liiska Hubinta Xirfadaha Kalkaaliyaha Daryeelka Guriga ayaa laga heli karaa**www.prometric.com/wadoh**. Imtixaanka Gacanta/xirfadda marka uu bilawdo waxa uu qiimeeyuhu kuu sheegi doonaa inaad qof daryeel qaate ah u samaysid saddex xirfad gacmeed. Qiimeeyuhu waxa uu kuu sheegi wakhtiga loogu talo galay xirfadaha lagaaga baahan yahay inaad samaysid. Si aad ugu guulaysatid xirfad, lagaagama baahna inaad si cajiib ah u samaysid, laakiin waxa lagaaga baahan yahay inaad soo bandhigtid inaad garanayso xirfadda. Qiimeeyuhu waxa uu eegi sida aad wax u samaynayso isaga oo barbar dhigaya waxqabadkaaga xirfadda waxa laga rabo.

Xeerarka imtixaanka Xirfadaha ayaa kuu oggol inaad dib u sixi kartid marka aad xirfad samaynaysid. Waa inaad u sheegtaa qiimeeyaha inaad wax ka saxaysid xirfadda aad markaa ku guda jirto. Marka aad dhammaysid xirfad ee aad u sheegtid Qiimeeyaha inaad dhammaysay xirfaddan, kuma noqon kartid. Wakhti dheeraada laguma siinayo marka aad wax saxaysid. Maadaama uu kani yahay imtixaankii shahaadada ee gobolka, qiimeyaha looma oggola in uu ku caawiyo, wax ku baro ama uu ku siiyo tilmaan sida loo sameeyo xirfadda. Qiimeeyaha uma bannaana in uu kaala xaajoodo natiijadaada ama kaala hadlo waxqabadkaaga.

Codsadaha matalaya macmiilka

Waxaad istcimaali doontaa maanakuwin (caag sida qofka oo kale u samaysan) haddii aad u baahato muujinta xirfadaha daryeelka saxaaxa iyo dabada iyo/ama daryeelka katetarka. Xirfadaha kale ee hadhsan, codsadyaasha ayaa matali doona doorka macmiilka. Waxa lagaaga baahan yahay inaad qof kale oo imtixaanka galaya u matashid daryeel qaataha maalinta aad imtixaanka galaysid. Qiimeeyaha ayaa kuu khriyi tilmaamaha kuu sharraxaya kaalinta macmiil matalaha kahor inta aanu bilaaban imtixaanku.

Haddii aad caafimaad ahaan awgeed kari waydo inaad matasho doorka daryeel qaataha, sida haddii aad qabto sonkorow oo aanad cuni karin khudaarta kala duwan, fadlan u sheeg qiimeeyaha marka aad soo gasho goobta imtixaanka.

Waxa hoos lagu soo koobay waxyaabaha lagaaga baahan yahay marka aad matalayso daryeel qaataha.

Waxyaabaha aad samaynasid	Marka aad matalayso qof daryeel qaataha ah waa inaad
Dhaqdhaqaaqyo kala duwan	jiifsato sariir oo loo siiyo layli jimicsi hal garab, jilib, ama canqow la siiyo.
Daryeelka cagta	fariiso kursi oo ha laguu maydho cagta, cidiyaha lugaha ha laguugu toosiyo looxa cidiyaha, kadibna kriim ha laguu mariyo cagta.
Ka caawin dhar gashi	ku fadhiisato kursi oo ha laguu galiyo shaati, surwaal, sharabaado iyo kabo adiga oo dharkaaga hore xiran.
Cunto siin daryeel qaataha	ku fariiso kursi oo ha lagu siiyo khudrado kala duwan iyo biyo la cabbo.
Ka caawin socod	ha laguu xiro suunka joogsashada oo ha lagu socodsiiyo 20 tallaabo.
Rogid ama boos u beddel	sariirta jiifso oo ha lagugu caawiyo inaad soo fadhiisato, istaagto oo lagu saaro kursiga curyaanka.
Waxyaabaha aad samaynasid	**Marka aad matalayso qof daryeel qaataha ah waa inaad**

Nadiifi oo meel xafidan dhig ilkaha sanaaciga ah (dhenjarka)	ha lagu siiyo koobka ilkaha oo ay horay ugu ku jiraan ilkaha sanaaciga ah. Waxaad koobkan u dhiibi doontaa imtixaan qaataha. Ilkaha lama galin doono afkaaga.
U gali cago-gashiga haweenka (stocking) laastigga eh ilaa jilibka	jiifso sariirta marka qofka imtixaanka galayaa uu ku xirayo lugtaada cago-gashiga haweenka jilibka kuugu jooga.
Ka wareeji sariirta oo u wareeji wiiljeerka.	sariirta jiifso oogacan ha lagaa siiyo inaad kor u soo fariisato sariirta, oo aad istaagto oo lagu saaro wiiljerka.
Bixinta nadaafadda afka	ku fariiso kursi oo lagaa cadayo ilkaha.
Sii daryeelka ciddiyaha iyo gacmaha	ku fariiso kursi oo ha laguu qooyo ciddiyahaaga oo ha la nadiifiyo oo ha lagu simo looxa yar ee ciddiyaha. Kiriimka jidhkana waa la mariyaa gacmaha. Loshinka maqaarka ayaa waliba gacmaha la mariyaa.
Ka caawi daryeel qaataha qaadashada dawooyinka	ha lagu siiyo nacnac lagu metelayo in uu dawo yahay imtixaanka dhexdiisa. Waxa laguu oggolyahay inaad calashato ama liqdo nacnaca. Nacnaca la isticmaalayo waxay le'eg yihiin una samaysan yihiin sida dawooyinka. Waxa laguu oggol yahay inaad iska eegtid dawooyinka inta aan imtixaanku bilaaban.

Qaadashada imtixaanka

Ogaanshaha waxa ku sugaaya marka aad imtixaanka galayso waxay kaa caawinaysaa inaad isu diyaariso. Qaybtani waxa ka kooban tahay:

- Liiska waxyaabaha aad u soo qaadanayso goobta imtixaanka.
- Nidaamka la raacayo ee goobta imtixaanka.
- Hagaha kuu sheegaya si aad u fahanto natiijada imtixaanka.
- Macluumaadka ku saabsan rafcaan qaadashada.

Waxyaabaha aad soo qaadanaysid Imtixaanka

Waa inaad timaaddaa ugu yaraan **30 daqiiqadood kahor** ballantaada imtixaanka. Taasi waxay ku siinaysaa inaad meesha iska xaadiriso oo shaqaaluhuu xajiiyaan aqoonsigaaga. Waa inaad soo dhiibtaa dhammaan waxyaabaha hoos ku qoran:

Warqadda u oggolaansho imtixaan galidda. Waa inaad keento warqadda asalka ahayd ee eay Prometric kuu soo dirtay. Warqad nuqul ah lama aqbali doono.

Aqoonsiga. Waa inaad keento laba noo aqoonsi oo sharci ah si aad imtixaanka u gashid. Aqoonsigaasi **waa inay**:

1. Dowladdu soosaartay (tusaale ahaan., liisanka darawalka, aqoonsi gobolku soosaaray, aqoonsiga ciidanka ama baasaboor) ay ku jiraan:

   Labadoodaba sawir waa dhow la qaaday iyo saxiixaaga; iyo
   Magac la mid ah ka aad ku codsaty imtixaanka (marka lagu daro kuwa sifaynta ah sida "Jr." iyo "III").

2. Aqoonsiga labaadi waa inuu lahaado magacaaga iyo saxiixaaga. Tusaale ahaan kaarka labaad ee aqoonsiga noqon kara waa kaarka maktabadda,

liisanka ugaadhsiga, kaarka Sooshal Sekuuritiga ama kaarka deynta. Warqad nuqul ah lama aqbali doono.

Muhiim: Haddii aad dhiibi waydo aqoonsi sax ah marka aad galayso imtixaanka waxa laga soo qaadi doonaa in aanad iman ballantaadii. Waxaa lagaa rabaa inaad bixiso dhammaan lacagta imtixaanka si mar dambe ballan imtixaan laguugu qabto.

Muhiim: Inta aanad galin imtixaanka waxa lagaaga baahan yahay inaad ka jawaabto su'aal markhaatikac kombiyuutarka ah kahor intaadan bilaabin imtixaanka. Haddii aad oggolaan weydo su'aashaas markhaatikaca ah, laguuma oggolaanayo inaad gasho imtixaanka. Waxa lagu wayddiisan doonaa inaad si guul ku dhammaystirtay tababbarka loo baahan yahay imtixaanka ka hor, iyo haddii lagaa dhaafay shaqo hore oo daryeel bixiye wakhti dheer darteed (Sida ku ku cayiman dariiqa 2aad) ama inaad haysatid caddaymo kale (Dariiqa 3aad). Shaqaalaha goobta imtixaanku waxay xaq u leeyihiin inay u diidaan codsade kasta marka kaarka aqoonsigu la dhiibo:

- U ekaado inuu faalso yahay ama wax laga beddalay.
- Leyahay sawir aan u ekayn codsadaha imtixaanka galaya. Fadlan hubi inuu aqoonsigaagu leeyahay sawir dhawaan ah.
- Leh saxiix aan u ekayn ka codsadaha imtixaanka galaya.

Soo Daahyaasha. Haddii aad ka soo daahdo ballanta imtixaankaaga, waxa laguu diidayaa inaad gasho imtixaanka. Markaana waxa lagaa rabaa inaad bixiso khidmad imtixaan kale oo aad ballan cusub imtixaanka aad u samaysatid.

Dharka la soo gashanayo. Imtixaanka xirfadda si aad u gashid waxa lagaa rabaa inaad soo xiratid sharabaaddo iyo kabo siman oo inta hore xiran tahay oo aan siisiibanayn. Waxa lagugula talinayaa inaad u labisatid sidii oo aad shaqo tagaysid, oo aad soo xiratid dhar ammaan ah oo aad ku qaban kartid xirfadda aad samaynaysid. Waxa laguu diidi karaa inaad soo gashid goobta imtixaanka haddii aanad dhar ku habboon soo xiranin. Haddii laguu diido inaad gasho imtixaanka, waxa kaa khasaaraya lacagtaadii kadibna waa inaad bixisaa lacag kale si aad ballan imtixaan oo kale u heshid.

Ogsoonow Maadaama aad imtixaanka Xirfadda iyo Aqoontu ay qaadan karaan dhowr saacadood, waxa lagugu la talainayaa inaad soo qaadato cunto fudud iyo/ama qado iyo cabbitaan aan khamri lahayn. Iyada oo aan la oggolayn in imtixaanka dhexdiisa waxa lagu cuno ama cabbo, haddana waxa jira meelo laguu tilmaami doono inaad wax ku cuni kartid marka aad sugaysid imtixaanka. Ha isku hallaynin mishiinka cuntada laga iibsado inuu yaallo goobta imtixaanka.

Xeerarka xarunta imtixaanka

Goob kastaba xeerarkan soo socda ayaa lagu dhaqmayaa. Haddii aad raaci waydo xeerarkan waxa kaa baaba'aysa qaadashada imtixaankaaga. Shirkadda Prometric waxay xuquuq u leedahay inay cod iyo fiidiyo ka duubto xiliga imtixaanka.

Tixraacyada

- Looma oggola agabyada, waraaqaha, ama waxyaabaha imtixaan u akhriska loogu talagalay goobta imtixaanka imtixaanka. Haddii lagugu helo

adiga oo kuwaas ama kuwo kale adeegsi, waxa lagaa joojinayaa imtixaanka jawaabahaagana wax dhibco ah ku heli maysid.

Sheyadaada shaqsiyeed

Prometric mas'uul kama aha sheyda aad u soo qaadato goobta imtixaanka. Waxa lagu talinayaa inaan sheyo shaqsiyeed aan loo soo qaadan xarunta imtixaanka. Ogsoonow arrimahan soo socda:

- Aaladaha elektroonigga **looma** oggola xarunta imtixaanka. Kuwaas waxa ka mid ah **telefoonnada gacanta,**, PDA-yada, beejarrarda(pagers) kameeradha, rekoodhka, iwm. Sheyadan oo dhan waxa ururin doona qiimeeyaha goobta imtixaanka.
- Sheyada kale ee shaqsiyeed —shandadaha iyo boorsooyinka iwm. —looma oggola goobta imtixaanka. **Ogsoonow:** Waxa lagu talinayaa inaan loo soo qaadan boorsooyin goobta imtixaanka. Lama oggola inaad marin uhesho boorsadaada inta lagu jiro imtixaanka.

Biririfta Musqusha Loo Qaato

- Haddii aad ka baxdid qolka imtixaanka iyada oo imtixaanka lagu jiro, waa inaad saxiixdaa warqadda bixidda/soo galid iyada oo uu kaa lumayo wakhtigii imtixaanku.
- Marin uma helysid sheyada shaqsiyeed muddadan birifta lagu jiro.
- Laguumana oggola inaad isticmaashid wax aalad elektroonig ama telefoon ah.

Booqdayaasha

- Looma oggola goobta imtixaanka marti, carruur iyo reerkaaga.

Dhaqanka xun iyo qalalaasaha

- Haddii aad ku kacdo qalalaase ama dhaqan xumo ama xarqalad, waxaad lagaa joojin doonaa imtixaanka. Haddii lagaa joojiyo, natiijadaada waa la masaxayaa. Tusaalooyin waxa ah: caawimo siin ama caawimo helid, **telefoon soo dhaca goobta imtixaanka**, qofka metelaya daryeel qaataha oo hadlaya, inaad dhaqaaqdid ama dhaqdhaqaaq samaysid iyada oo aan lagu waydiin, iska yeelid qof kale, ka qaadasho aaladda ama warqadaha imtixaanka aad ka qaadato goobta imtixaanka, isticmaalka kalmado xun ama dhaqan xun oo dib u dhiga imtixaanka ama carqaladeeya.

Hubka

- Hubka looma oggola goobta imtixaanka.

Muhiim Mar kasta oo aad soo gasho qolka imtixaanka, waxa lagaa codsan doonaa inaad jeebadaha soo saartid si loo arko in waxyaabo aan la oggolayn aanad haysan. Maamulaha goobta imtixaanka ayaa qaadi doonaan alaab kasta oo ka soo horjeedda sharciga.

Su'aalaha xuquuqda miguurinta. Su'aalaha imtixaanka dhammaantood waxa xuquuqdooda leh Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington oo waxa dhowra xuquuqda minguurinta. Sharciga federalka ayaa sheegaya ciqaab daran oo dacwo madani ama dambi lagu qaado minguurinta, qayninta, ama soobandhigga waxayaanaha leh xuquuqda minguurinta.

Natiijada imtixaankaaga

Natiijadaada waxa loo wargalinayaa DOH haddii aad ku guulaysatay iyo haddii kaleba dhammaystirkaaga labada qaybood.

Imtixaanka aqoonta

Maadaama imtixaankaaga lagu qaadanayo kombuyuutarka, dhibcaha natiijadaada waxa lagu siinayaa iyada oo daabacan isla markaasba kaddib markaad dhammayso imtixaanka. Warbixinta natiijada dhibacaha waxa ku qornaan doona natiijo guud oo ah ka gudub ama ku dhicitaan. Warbixinta natiijada waxa kale oo ku qoran inta aad keentay qayb kasta ee imtixaanka

boqolkiiba. **Shaqaalaha goobta imtixaanka looma oggola inay kaala hadlaan natiijadaada ama waxqabadkaaga**.

Si aad ugu guulaysatid Imtixaanka aqoonta, waa inaad tiro guud sulaao sax ah. Ma aha muhiim inaad ku gudubtid ka koobnida qayb kasta. Tani waxa ay suurtagalinaysaa inaad ku dhactid qaybo ka mid imtixaanka laakiinaad celcelis ahaan marka la isku daro natiijada aad ku guulaysatid imtixaanka. Xitaa haddii aad guulaysatid, waxa lagugula si aad ah laguugu dhirrigalinayaa inaad ku nuuxnuuxsatid qaybaha kaaga baahan fiirada dheeraadka ah markaad bilawdid inaad daryeel siisid bulshada.

Imtixaanka xirfadda

Warbixinta natiijadaada waxaad ku helaysaa goobta imtixaanka wax yar kaddib marka uu dhammaado imtixaanku. Warbixinta waxa ku qoran xirfad kasta iyo inaad ku guulaysatay ama ku dhacday. Waa inaad ku guulaysataa shanta qayboodba si aad uga gudubtid imtixaanka Xirfadda. Haddii aad ku guulaysan waydo imtixaanka waxa lagu siinayaa macluumaadka sidii aad u qaadan lahayn imtixaanka mar kale. **Qiimeeyaha imtixaanka kaa qaadaya Imtixaanka xirfadaha looma oggola inuu kaala hadlo natiijadaada ama waxqabadkaaga**.

Ogsoonow Inay natiijadu leedahay asturnaan soo aan lagu bixin telefoonka. Wixii su'aalo ama talooyin ee ku saabsan imtixaanka waxa loo gudbinayaa Prometric800.324.4689.

Haddii warqad daabacuhu ka xumaado goobta imtixaanka, waxaadka tagi kartaa onayline si aad u aragto natiijooyinkaaga rasmiga ah. Raac tallaabooyinkan:

1. Dhexgal **https://ibt.prometric.com/wadoh**.
2. Guji meesha looga ammaanka ahaan.
3. Gali Aqonsigaaga Prometric meesha ay magacaaga istcimaale iyo eray-furahaaga (lamabarkan ayaa ku qoran warqaddaada ATT. Haddii aadan warqadda haysan, waxaad la soo xiriiri kartaa adeegga macaamiisha si aad u heshid.
4. Meesha "Main Menu"ga markaad joogto, guji xiriiryaha ay ku qoran tahay "Review Scores".
5. Guji natiijada taariikhda imtixaanka ee ku qoran qaybta "history" si aad u heshid warbixinta natiijada imtixaankaaga.
6. Si aad u aragtid tallaabooyinka aad dhaaftay ee imtixaanka xirfadda, guji xiriiryaha "score report" meesha ay ku qoran tahay "item feedback".

Dib u Eegga Imtixaanka Aqoonta

Haddii aad rabtid inaad dub u eegtid su'aalaha imtixaanka ee aad khalad uga jawaabtay, waxaad samayn kartaa inaad soo dirto dalab adiga oo dooranaya qaybta $40 dollar ah ee dib u maridda imtixaanka. Waxa lagu ogaysiinayaa imtixaankaaga dib u eegistiisa sida laguu ogaysiiyay taariikhda imtixaanka oo kale. Markaad timaaddo goobta imtixaanka waxa lagu wayddiinayaa inaad u saxeexdid oo aad aqoonsigaaga tustid sidii marka aad imtixaanka galayso oo kale. Hase yeeshe xaggii imtixaan aad gali lahayd, waxa lagu siinayaa daabacaad oo adiga kaliya kuu muujinya Imtixaankaagii aqoonta oo ay ku qoran tahay su'aalaha aad khaladay, jawaabta khaladka ah ee aad dhiibtay,

iyo jawaabaha saxda ah ee ku habboonayd. waxaad haysataa shan iyo afartan daqiiqadood inaad du u eegto imtixaankaaga. Laguuma oggola inaad qolka kala baxdid wax qoraal ah. Dhammaan shuruudaha ammaanka ee khuseeya muddada imtixaanka ayaa sidoo kale khuseeya kulanka dib u eegga. Waa inaad sugtaa 30 maalmood dib u eegga kaddib si aad ballan kale oo imtixaan u dalbatid.

Habsocodka rafcaanka

Hadafkayagu waa inaan bixino imtixaan tayo leh iyo xaalad imtixaan oo fiican oo u maro codsade kasta. Haddii aanad ku qanacsanayn midkoodna oo aan wax ka beddali karno dhibaatada, waxaan jecelnahay inaan war kaa helno. Waxa aan fursad u bixiinnaa in qof kastaa faallooyin guud dhiibtaan imtixaanka kaddib. Faallooyinkaaga ayay eegi doonaa shaqaalahayagu, laakiin wax jawaab oo toos ah ma heli doontid.

Haddii aad jeceshahay inaad soo gudbiso rafcaan ku saabsan imtixaanku waxa uu ka kooban yahay, isqoritaank, ballanta ama sida imtixaanka loo bixinayo (habraaca goobta imtixaanka, qalabka, shaqaalaha, iwm), fadlan soo gudbi rafcaan adiga oo booqda**www.prometric.com/contactus**.

Warqadda rafcaanku waa inay bixisaa magacaaga, aqoonsiga Prometric, cinwaanka imtixaanka, taariikhda aad gashay imtixaanka iyo faahfaahin waxaad ka cabanaysid oo ay la socoto xaqiiqooyin cad. Waraaqaha waa in helaa gudahooda 60 maalmood marka laga soo qaado taariikhda imtixaanka. Hubi inaad saxiixdo oo aad ku qortid cinwaanka lagu soo celinayo jawaabta.

U dir warqaddaada rafcaanka:

Prometric

ATTN: Appeals Committee

7941 Corporate Drive

Nottingham, MD 21236

Guddiga Rafcaanka ayaa eegi doona cabashadaada oo kuugu soo diri jawaab 20 maalmo shaqo kaddib maalinta ay warqaddaada la helo.